

## **CAYMISKA BAABUURTA**

*Sharciga California wuxuu dhigayaa in dhamaan dadka leh ama wada baabuurto ay haystaan caddeyn caymis. Waa in aad xafiis caymis ka soo qaadataa warqadaha caymiska. Haddii aad shil gasho oo aadan caymis haysan shatigaaga waa la kansalayaa. Waxaa weliba lagugu ganaaxayaa \$1350 haddii lagugu qabto adigoo gaari wada caymis la'aan.*

*Sharciga California waxa uu dhigayaa nooca caymis ee ugu yar ee laga rabo qofka. Kuwan soo socdaa waa inta ugu hooseysa shilkiiba ee la rabo in aad caymis ahaan u haysato:*

- 15,000 dhimashada ama dhaawaca halka qof
- \$30,000 dhimashada ama dhaawaca wax ka badan hal qof
- 5,000 hantidii burburta

*Marna ha wadin gaari haddii aadan haysan caymis dabooli kara dhibka kaa dhaca.*

